



DARYEELIDDA CANUGGA QABA COVID-19

15. februára 2022

Haddii ilmo qoyskaaga ah [uu la xanuunsado COVID-19](#), waa in waalidku iyo daryeeleyaashu sii wadaan in ay daryeel siiyaan kana taageeraan baahiyihiisa maalinlaha ah. Caruurta intooda badan waxaa ku dhaca astaamo yaryar oo COVID-19 ah marka loo barbardhigo dadka waaweyn. Qaar kamid ah caruurta qabta COVID-19 si aad ah ayay ula xanuunsan karaan, waxay u baahan karaan in isbitaal loo qaado amase waxay noqon karaan kuwo xaaladdoodu culus tahay waxayna yeelan karaan astaamo muddo dheer jira.

U raadi daryeel caafimaad haddii canuggaagu yeesho mid kamid ah waxyaabaha soo socda:



Haddii uu ka yaryahay 3 billood uuna leeyahay qandho ama dhibaato ka haysato neefta



Haddii uusan hurdada kasoo toosayn



Qandho haysa wax ka badan 7 maalmood



Qandho nabro maqaarka ah wadatau



Midabka maqaarka oo buluug noqda



Matag iyo shuban joogto ah



Haddii uusan cabbayn dareereyaal ku filan



Haddii difaaciisa jirku liito qandhana leeyahay

Ka hortag sii faafitaanka COVID-19 adiga oo:



Xiranaaya [maaskare si fiican kuu le'eg](#) marka aad guriga dhex joogto;



Jeermisdilaya waxyaabaha inta badan la taabto sida saxamada, maacuunta, miisaska, qasabadaha, qataarada albaabada iyo ganta la qabto suuliga;



Iska kaliyeelaya sida ugu macquulsan xubnaha qoyska ee khatarta badan ugu jira in ay si daran ula xanuunsadaan COVID-19;



Aan canuggaaga sariir kula seexanayn;



Gacmaha ku dhaqanaya biyo iyo saabuun;



Sida ugu badan ee ugu macquulsan, lix fiit/ laba mitir u jirsanaya dhammaan dadka kale ee qoyska;



Kordhinaya hawada guriga soo galaysa adiga oo furaya daaqadaha haddii aysan dhibaato ka imaanayn;



Dhammaan [xubnaha qoysku](#) waa in ay guriga joogaan muddada iskaliyeelidda oo kale.

In aan caruurteena ka caawino [in la tallaalo](#) ayaa ah arrinta ugu muhiimsan ee aan wakhti xaadirkaan qaban karno si aan COVID-19 uga ilaalino caruurteena, qoysaskeena iyo bulshada.